

Safarkii badbaadada



Möllö Pöötinen

Möllö ayaa subaxnimadii Axadii si farxad leh u soo toosay. Daaha gadaashiisa ayeey fallaaraaha qorrxadu soo dhaafeen, dibadana waxaa laga maqlaayey cod shibireed. Wuxuu ka soo boodaa sariirta, wuxuuna si caga jiida uu soo aadaa xaga jikada. Halkaas ayuu ku dhacayaa hooyadiis Marja. Is ilaali wiilkaygii qaaliga ahaayow. Waxay lahayd timo gaaban oo dhalaalaya, waxayna gashaneyd dharka jiifka oo iyadu ka sameeysay maro madow. "Hooyo waan ka xumahay" Möllö ayaa si qabow ugu jawaabey. Miiska fariiso. Halkaas waxaa yaalla canjeelo, "ayey Marja ku tiri cod daallan.



Möllö wuu u riyaaqay
quraacda,
Wuxuuna dul saartay
macmacaan uu muuqaalkiisa
fican yahay, isla markaana
wuxuu cabay koob weyn oo
cabitaan liin ah.

Taleefoonkiisii oo miiska
saarnaa ayaa soo dhacaya,
wuxuuna u kacay inuu soo
qaato,, laakiin hooyadiis ayaa
kaga hormartay oo u keentay.
"Waa Ilmari!"

Ayey ku tiri cod faraxsan,
Möllöna u dhiibtey taleefanka
oo gariiraya.

"Haye Ilmari, sidee tahay?"
ayuu isagoo fekeraya ku yirii,
maadaama uusan filayn
telefoon subaxa hore.



"Haye Saaxiib! Wuxaan u maleynayaan
inaan u baahanahay caawinaad yar,
meel ayaan ku xayirmay.. "ayuu cod
cabsi leh ku yiri.

"Wuxaan joogaa buundada
dhinaceeda kale, maxaa yeelay way
jabtay"

Ilmari ayaa sii watay.

Möllö ayaa qosol ugu jawaabey.

" miyaadan ka soo dul duuli karin?"

" maya, waxaan ahay dawaco.

Anigu shimbir ma ihi sida adoo kale,"
ayuu si dhab ah ugu jawaabay.

Telefoonkiina wuu go'ay, Möllö daaqada ayuu ka fiirihey wuxuuna si hoose u yiri "Saaxiibkeey meel halkaasuu joogaa wuxuuna u baahan yahay caawinaadeyda"

Wuxuu u orday qolkiisa, boorsadiisiina soo qabsaday, una qayliyey hooyadiis, "Marka qof dhibaato ku dhacdo, waa inaad caawintaa. Is arag danbe!".

"Xagee ka had...", laakiin ka hor intaysan Marja hadalkeeda dhameysanba Möllö markiiba si xoogan ayuu albabka u xiray baxayna.



Markii uu yimid buundada oo u dhoweyd gurigooda, wuxuu arkay saaxiibkiis dawaco Ilmari oo taagan buundada dhinaceeda kale. Möllö intuu boorsadiisa dhulka dhigtay ayuu dul duulay buundada. Buundada ayaa ahayd mid aad u daxaleysatey oo bunni ah. Qeyb ka mida ayaana go'day oo lalmatey hawaduna hadba dhinac u tuureysey.



Markii uu dhulka soo degay ayuu Ilmari weydiiyay "ma ficanahay? Naftaada wax ma u geysatay?". "Waan ficanahay, Waxaan kaliyoona rabaa inaan ka tago meeshaan. Fiiri, waalidkay ma oga in aan meeshaan joogo. Waxaan Kaliyoona u sheegay inaan dibada soo lugeynaayo."



“Waan kaa saareynaa meeshaan wax dhiba majiro. Ka taxadar cirifyada, waxay u muuqdaan kuwa adage., tallaabo qaldan haddaad qaado waxa laga yaabaa inaad halkaas hoose ku dhacdee” ayuu Möllö yiri isagoo xaga hoose tilmaamaya. Meel aad uga hooseysa buundada waxaa qulqulaya durdur buluuga oo dhalaalaya. Markuu gadaashiisa firiyeyna, mase Ilmari geeskuu ku taagan yahay. “Maya maya ..” aad u taxadar ayuu si hoose usala hadlayaa si ayan dhagxaantu cagahooda uga hoos bixin. Waxayse ahayd miduu la soo daahay oo Ilmari wuuba dhacday. Wuxuu mar kaliya maqlay qaylo., “Möllö i caawin !!”. “Laakiin waxaa laga yaabaa in dhaawac i soo gaaro. Ma aqaan inaan ku caawini karo. Ka waran haday wax gaareen. Möllö wuu ogaa inuu caawini karo haduu naftiisa uu aamino.




Intuu soo orday ayuu ka duulay cirifka
dhagxaantii dumeysey una duulay
xaga webiga ka hooseeyey. Qabowga
hawada ayuu baalashiisa ka dareemay
isgoo ku sii dhowaanaya mar walba
xagga hoose...



Möllö Pöötinen wuxuu soo qabtay
Ilmari wax yar ka hor intuusan
biyaha ku dhicin!

"Waan badbaadney!" ayey ku dhawaaqeen.
"Waxaad ahayd mid cajiib ah." Ilmari ayaa
sidaa yiri. Meel fog ayaa cod ambalaas laga
maqlaayey. Gaarigii markuu soo gaarey
ayay Möllö hooyadiis ka soo boodday.
"Qaaligaygiyow, Ma fican tahay?
Maxaad iiigu sheegi weyday meeshaad
aadey? Aad baan kaaga welwelsanaa.
Waa kaa niyad jabay." Möllö ayaa si faan leh
ugu jawaabtay, "Hooyo, labadeenuba waan
ficanahay. Ilmari ayaan badbaadiyey!"
"Taasi waa ... Cajiib! waa mid aad u
wanaagsan." Marja ayaa sidaa tiri.



Dhakhaatiirtu markay sharooto Möllö baalka ugu dhejeen ayey ku wada boodeen baabuurkii Marja. "Haye, sidee bay jalaato idin la tahay ka hor intaan Ilmari gurigooda la geyn. Wax dhiba ma leh, koley way ogyihii wixii dhacay." "Taasi waa mid wanaagsan." ayeey wiilashii ugu jawaabeen. Möllö bal halkan imow? Hooyadii ayuu derbiga dhiniciisa kale ula wareegay. Aad ayaan kuugu hanweynahay. Naftaada waad aamintey. Qaar badani kuma dhaceen! Wuxaad tahay wiil geesi ah, "ayeey cod diirran ku tiri. "Mahadsanid hooyo. Adigaa dadka ugu fican!

Ka dibna Labadoodiba waxay u soo noqdeen Ilmari, waxayna bilaabeen inay ku raaxaysteen Jalaatadoodii.



Dhammaad

